

FAAFINTA

الرسمية



RASMIGA

الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 10-aad. Garowe 16. August 2008

Lam. 8

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudahiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qeybta Koowaad

Sharci

Qeybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Sharci Lr.2. ee 14/08/2008,, kuna saabsan xeerka Ansixinta Hanti Dhowrka
Guud ee DGPL

DAWLAD GOBOLEEDKA
PUNTLAND EE SOMALIYA



PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

Sharci Lr.2 ee 14/08/2008, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Hanti Dhowrka Guud

Madaxweynuhu

- Markuu arkay** : Dastuurka DGPI qodobkiisa 54-aad faqradiisa 14-aad.
- Markuu arkay** : Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/050/2008 ee 06/08/2008.
- Markuu Garowsaday** : Ansixinta Sharcigan ee Golaha Wakiilada.

Wuxuu soo saaray

Sharcigan soo socda:-

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen sida kor ku cad Ansixinta Hanti Dhowrka Guud ee DGPL


Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

Qodobka 3-aad

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta Madaxweynuhu Saxiixo.

WABILAAHI TOWFIIQ


Mud. Maxamuud Muuse Xirsi
Madaxweynaha DGPL

DAWLAD G. PUNTLAND
EE SOOMAALIYA



PUNTLAND STATE
OF SOMALIA

Golaha Wakiillada

Representative Council

Xafiiska Guddoomiyaha

Ref:- XGGW/DGPL/ 50 /2008

Date:- 06/08/08

Ku:- Madaxweynaha DGPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta Hanti Dhowrka Guud DGPL.

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILADU:-

Markuu Arkay :-

Dastuurka DGPL

Markuu Arkay :-

Soo Gudbinta Golaha Xukuumada DGPL
Ee 15/03/2008 kuna saabsanayd Ansixinta
Hanti Dhowrka Guud DGPL

Markuu Dersey:-

Baahida loo qabo in la ansixiyo Hanti
Dhowrka Guud ee DGPL

Markuu Dhegeystey:-

Doodii Golaha Wakiillada DGPL

Markuu Arkay:-


Ansixintii Golaha Wakiillada
ee 23/07/08 ee Hanti dhowrka Guud DGPL.

WUXUU GUDDOOMIYEEY:-

Ansixinta Hanti Dhowrka Guud ee DGPL.

Wabilaahi Towfiiq.

Axmed Cali xaashi
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DGPL.





BOSASO

Xeer Madaxweyne Lr. 39/08 ee March 08, 2008, kuna saabsan xil magacaabid
Guddoomiyaha Hanti-dhawrka Guud, Guddoomiye-ku-xigeenka Hanti-
dhawrka Guud, Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Puntland


Madaxweynaha Dowladda Puntland

- Markuu arkay: Dastuurka DGPL qodobkiisa 54^{aad} faqradiisa 19^{aad}
Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo in wax laga badeho Hab-xisaabeedka
Dowladda
Markuu arkay: Aqoontooda iyo waayo aragnimadooda

.Wuxuu Xeeriyey:

- 1- Maxamed Yuusuf Cabdi (Mattaaan) waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Hanti-
dhawrka Guud ee DGPL.
- 2- Xasan Mire Cismaan waxaa loo magacaabay Guddoomiye-ku-xigeenka Hanti-
dhawrka Guud ee DGPL.
- 3- Xasan Aaden Maxamed waxaa lagu meeleeyey Wasaaradda Shaqada iyo
Shaqaalaha.
- 4- Jaamac Maxamed Cismaan waxaa lagu meeleeyey Wasaaradda Shaqada iyo
Shaqaalaha.
- 5- C/risaaq Xasan Muuse waxaa loo magacaabay Xisaabiyaha Guud ee DGPL.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo.


Maxamuud Muuse Xirsi
Madaxweynaha Dowladda Puntland

